

**Maarso 5-teeda, 2024:** Doorashada Sannadlaha ah ee Magaalada iyo Doorashada Hordhaca ee Madaxtinimada

**FADLAN OGAW: Waxaa jiri doona laba sanduuqyada codaynta ah oo kala duwan bisha Maarso.**

- Sanduuqa Cod-bixinta ee Doorashada Sanadlaha ee Magaalada waxaa **boostada loogu diri doona dhamaan cod-bixiyayaasha diwaangashan.**
- Sanduuqa Codaynta Doorashada hordhaca ee Madaxweynanimada ayaa waxaa **boostada loogu soo diri doona cod-bixiyayaasha marka ay codsanadaan kaliya.**

### Codaynta Wakhtiga Hore ah

- **DOORASHADA SANADLAHA EE MAGALAADA** warqadaha cod-bixinta waxaa boostada loogu diri doona dhamaan cod-bixiyayaasha rasmiga ee ka diwaangashan Burlington bisha Febraayo 14<sup>keeda</sup>. Haddii aadan helin warqada cod-bixinta ugu dambeyn Febraayo 21<sup>deeda</sup>, fadlan la xiriir xafiiska karaaniga/Khasnajiga.
- **Cod-bixinta MADAXWEYNANIMADA EE HORDHACA AH** LOOGUMA diri doono boostada dhamaan cod-bixiyayaasha. Haddii aad rabto inaad codsato in warqadan cod bixinta laguugu soo diro boostada, fadlan ka codso mid onlaynka barta [mvp.vermont.gov](http://mvp.vermont.gov) ama wac Karaaniga xafiiska Magaalada lambarka (802) 865-7000.
- Si taxadar leh u raac dhamaan tilmaamaha marka aad buuxinayso warqada cod-bixinta maqnaanshaha. Hubi inaad SAXEEXO baqshada oo MOORI warqadda cod-bixinta gudaha dhexdiisa haddii kale codkaagu lama tirin doono.
- Kusoo celi sanduuqa la codeeyay:
  - **City Hall Isniin ilaa Jimcaha , 8:00 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo.**
    - Isniinta ilaa Jimcaha, 8:00 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo ilaa Maarso 1<sup>deeda</sup>.
    - Isniinta, Maarso 4<sup>teeda</sup>, laga bilaabo 8:00 subaxnimo ilaa 1:00 duhurnimo
  - **Goobta La Keenayo Waraaqa Codaynta Waxay ku Yaalaan:**
    - Xarunta Dhexe ee Magaalada - Jidka Weyn ee dhismaha ka soo horjeeda Flynn Theater
    - Waaxda Hawlaha Guud – 645 Pine Street
    - Xarunta Dab-damiska #2 – 132 North Avenue, rear of building
    - Robert Miller Community Center – 130 Gosse Court
    - Xarunta Dab-damiska #3 – 20 Mansfield Avenue
  - **Goobta cod-bixinta ee maalinta doorashada inta u dhaxaysa 7:00 subaxnimo iyo 7:00 habeenimo.** Liiska goobaha cod bixinta waxaa laga heli karaa <https://www.burlingtonvt.gov/CT/Maps-Wards-State-Districts-and-Polling-Places>
    - **Sababo la xiriira dib u dejinta xaduudaha codaynta magaalada, xaafadaada iyo goobta cod-bixinta ayaa laga yaabaa inay isbeddeleen.**

Xaqiiji xaafada aad ku nooshahay

<https://www2.burlingtonvt.gov/Clerk/Elections/Map/>

### Codaynta Shakhsi ahaaneed

- Goobaha cod bixinta waxay furnaan doonaan 7:00 subaxnimo iyo 7:00 galabnimo  
Maalinta Doorashada
- Keen warqadda cod-bixinta ee lagu soo diray goobtaada cod-bixinta. Haddii aanad helin warqad cod-bixin ah ama aanad keenin, waxaad weli awoodi doontaa inaad codayso. Si kastaba ha ahaatee, waxaa lagu weydiin doonaa inaad saxeexo warqada dhaarashada marka hore.
- Cod-bixiyayaasha aan awoodin inay tagaan goobtooda codbixinta, jirro ama naafanimo awgeed, waxay la xiriiri karaan xafiiska kararaaniga si ay u codsadaan ka hortagga codbixinta ee goobtooda codbixinta, gaarsiinta cod-bixinta elektarooniga ah, ama bixinta cod-bixinta guriga ee keenaan Justices of the Peace.

### Taariikho Muhiim ah

**Febraayo 14<sup>keeda</sup>** – Warqadaha Cod-bixinta Doorashada Sannadlaha ah ee Magaalada waxaa boostada loogu diraa dhamaan cod-bixiyayaasha diiwaangashan

**Maarso 4<sup>teeda</sup>, 1 galabnimo** – Wakhtiga kama dambaysta ah ee diiwaangelinta cod-bixinta onlayn ama Xafiiska Khasnajiga Karaaniga kahor Maalinta Doorashada; Isu-diwaangelinta Maalinta Doorashada waxa laga heli karaa goobtaada cod-bixinta ee Maarso 5<sup>teeda</sup>.

**Maarso 4<sup>teeda</sup>, 4:30 galabnimo** – Maalinta kama dambaysta ah ee keenitaanka warqadda cod-bixinta ee sanduuqa soo gudbinta

**Maarso 5<sup>teeda</sup>** – Maalinta Doorashada! Cod-bixintu waxay furan tahay 7:00 subaxnimo ilaa 7:00 habeenimo

### Helitaanka Luuqada

- Haddii aad u baahan tahay turjumaan Maalinta Doorashada, ama cod-bixinta hore, fadlan ka codso xubin ka tirsan shaqaalaha xafiiska karaaniga ama sarkaalka doorashada ee goobtaada cod-bixinta. Waxaad xaq u leedahay turjumaan LACAG LA'AAN AH. Xafiiska City of Burlington's Community & Economic Development (CEDO), wuxuu bixiyaa adeegyo turjubaan in ka badan 240 luqadood.